Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

**Xeer Ra'iisal Wasaare Lr. 180** **Taariikh: 15/06/2025**

**XEER: XEERNIDAAMIYAHA XARGAHA ISGAARSINTA BADDA HOOSMARA**

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
16 JUN 2025
EX.1
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 97aad faqradda 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), (f) iyo (i); iyo Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG;

**Markuu arkay:** Soojeedinta Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknologjiyadda **XW/WI&T/078/25** ee JFS, ku taariikhaysan 26/05/2025, kuna saabsan Xeernidaamiyaha Xargaha Isgaarsinta Badda Hoosmara;

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.17.120.06.25** ee **12/06/2025**, kuna saabsan **Xeernidaamiyaha Xargaha Isgaarsinta Badda Hoosmara** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgaliyay:** Muhiimadda ay u leedahay kordhinta awoodda baaxadda internet-ka yimaada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

**Waxaa uu meelmariyay:**

**Qodobka 1aad:**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.17.120.06.25** ee **12/06/2025**, kuna saabsan **Xeernidaamiyaha Xargaha Isgaarsinta Badda Hoosmara** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

**Qodobka 2aad**

**Hirgalin**

Waxaa Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknologjiyadda loo igmaday in ay hirgaliso, meelmarisana Xeernidaamiyahan.

**Qodobka 3aad**

**Dhaqangal**

Xeernidaamiyahan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

2025

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
## WASAARADDA ISGAARSIINTA IYO TEKNOLOJIYADDA

# XEER-NIDAAMIYAHA XARGAHA ISGAARSIINTA BADDA HOOSMARA

**TUSMO:**

# TUSMO


**Qodobka 1aad:** Magaca Xeer-nidaamiyaha 3

**Qodobka 2aad**: Qeexid 3

**Qodobka 3aad**: Ujeeddada Xeer-nidaamiyaha 4

**Qodobka 4aad**: Baaxadda Adeegsiga 4

**Qodobka 5aad**: Saldhigga Sharciga ee Xeer-nidaamiyaha 4

**Qodobka 6aad**: Codsiga Rukhsadda 5

**Qodobka 7aad**: Heshiisyada Shirkadaha Ajnabiga ah 7

**Qodobka 8aad**: Helitaan iyo Isla degitaanka 7

**Qodobka 9aad**: Tayada Adeegyada iyo Dammaanad-qaadka Heerka Adeegga 9

**Qodobka 10aad**: Kormeerka iyo Ciqaabaha u Hoggaansanaan la'aanta Xeer-nidaamiyahan 10

**Qodobka 11aad**: Soo Gudbin Warbixinnada 10

**Qodobka 12aad**: Xallinta Khilaafaadka 11

**Qodobka 13aad**: Dhaqan-galka Xeer-nidaamiyaha 12

## Qodobka 1aad:
## Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxaa loogu yeerayaa "Xeer-nidaamiyaha Xargaha Isgaarsinta Badda Hoosmara".

## Qodobka 2aad:
## Qeexid

Ereyada soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa macnaha ku hor qoran ama macnaha ay ku leeyihiin Sharciga Isgaarsiinta Qaranka.

1. **"Hay'adda"** waxaa loola jeedaa Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2. **"Sharciga Isgaarsiinta"** waxaa loola jeedaa Sharciga Isgaarsiinta Qaranka, Sharci Lr. 005 ee 2017.

3. **"Isla-dagid Dhisme ah (Physical Co-location)"** waxaa loola jeedaa adeeg ay bixiso shirkadda maamusha saldhigyada soo-degitaanka xargaha badda hoosmara, taasoo u suurta-gelineysa shirkad bixisa adeeg isgaarsiineed oo rukhsad heysata in ay dhigato agabkeeda si loogu adeegsado helitaanka baaxadda Internet-ka ee xargaha badda hoosmara ee xarumaha shirkaddu ay maamusha ee xargaha badda hoosmara; si ay ugu fududaato hawlaha rakibaadda, joogteynta iyo dayactirka agabyada lagama-maarmaanka u ah helitaanka baaxadda Internet-ka xargaha badda hoosmara, looguna qoondeeyo nidaam ku saleysan "ciddii soo hormarta haloo hor adeego".

4. **"Isla-dagid fogaan ah (Remote Co-location)"** waxaa loola jeedaa adeeg ay bixiso shirkadda maamusha saldhigyada soo-degitaanka xargaha badda hoosmara taasoo u suurtagelineysa shirkadda bixisa adeeg isgaarsiineed oo rukhsad heysata in ay hesho baaxadda xargaha badda hoosmara ee saldhigyada soo-degitaanka iyada oo adeegsaneysa bar ku xirasho fogaan ah (remote point).

5. "**Adeegyada gaaridda shabakada (backhaul facilities and services)**" waxaa loola jeedaa adeeg bixinta isku-xirka u dhexeeya saldhigyada soo degitaanka Xargaha badda hoosmara iyo dhismeyaasha shirkadaha bixiya adeegga isgaarsiinta ee Rukhsadda leh.

**Qodobka 3aad:**
**Ujeeddada Xeer-nidaamiyaha**

1. Kordhinta awoodda baaxadda Interneytka yimaada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2. Dejinta shuruudaha helidda adeeg loo dhanyahay ee baaxadda Interneytka caalamiga ah (international bandwidth), si loo fududeeyo horumarinta suuq furan oo tartan ku dhisan.

**Qodobka 4aad:**
**Baaxadda Adeegsiga**

1. Xeer-nidaamiyahan waxa uu khuseeyaa Shirkadaha rukhsadda leh ee ka shaqeeya saldhigyada soo-dajinta xargaha isgaarsiinta ee badda hoosmara ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2. Si loo soo dajiyo ama looga shaqeeyo Xargaha Isgaarsiinta ee badda hoosmara shirkaddu waa in ay heysataa Rukhsadda Adeeg Bixiyaha kaabayaasha iyo adeegyada isgaarsiinta (Communications Infrastructure and Services Provider License) ama Rukhsad Adeeg bixiye ee Kaabayaasha Isgaarsiinta Caalamiga ah (International Communications Infrastructure Provider License) ama rukhsaddii kale ee ay Hay'addu u qoondeyso mustaqbalka.

3. Haddii qodob ka mid ah xeer-nidaamiyahan uu ka horyimaado am ay is-waafaqi waayaan qodobbo ka mid ah shuruudaha rukhsadda adeegyada, qodobada xeer-nidaamiyahan ayaa noqonaya kuwa mudnaanta leh ee la raacayo.

4. Dhammaan dhinacyada lagu dabbaqayo qodobada xeer-nidaamiyahan waxa sidoo kale lagu dabbaqayaa dhammaan qodobada kale ee Sharciga Isgaarsiinta Qaranka iyo sharuucda kale ee khuseeya, dhammaan xeer-nidaamiyeyaasha kale ee Hay'addu hore u soo saartay ama soo saari doonto mustaqbalka.

**Qodobka 5aad:**
**Saldhigga Sharciga ee Xeer-nidaamiyahan**

1. Xeer-nidaamiyahani waxa loo cuskanayaa qodobbada 2aad, 3aad iyo 6aad ee sharci lr. 005 ee 2017, Sharciga Isgaarsiinta Qaranka.

2. Qodobka 2aad xarafka (i) ee Sharciga Isgaarsiinta waxa uu dhigayaa in Hay'addu masuul ka tahay bixinta rukhsadaha iyo sameynta xeer-nidaaminta isgaarsiinta.

3. Qodobka 3aad faqradda 1aad ee Sharciga Isgaarsiinta wuxuu awood u siinayaa Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka in ay maamusho dhammaan qeybaha isgaarsiinta ee gudaha xuduudaha Soomaaliya marka laga reebo isgaarsiinta ay isticmaalaan ciidamada.

## Qodobka 6aad: Codsiga Rukhsadda

1. Ka hor inta aan la billaabin rakibaadda xargaha isgaarsiinta ee badda hoosmara ama dhismaha saldhigyada lagu maamulo xargaha fiber-ka ee badda hoosmara, meel ka mid ah dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waa in ay shirkaddu ay heysato Rukhsadda Kaabayaasha Isgaarsiinta Caalamiga ah (International Communications Infrastructure Provider License).

2. Shirkadda doonaysa in ay hesho rukhsad ku saabsan dhigista xargaha fiber-ka ee badda hoosmara ama dhisidda saldhigga soo-dejinta xargaha fiber-ka ee badda hoosmara waa in ay u soo gudbisaa Hay'adda codsi rasmi ah.

3. Shirkad kasta oo horay u rakibtay xargaha fiber-ka badda iyada oo aan haysan rukhsad sharci ah, waa in ay ugu soo gudbisaa Hay'adda codsi rasmi ah muddada 30 maalmood gudahood ah oo ka bilaabanaysa taariikhda dhaqangalka xeer-nidaamiyahan.

4. Rukhsadluhu waa in uu soo gubdiyo codsi soo-dajin ee xargaha badda hoosmara, isagoo adeegsanaya foomka codsiga ee saaran mareegta hay'adda.

5. Rukhsadluhu waa in uu soo gudbiyaa codsi gaar ah oo ku saabsan xarig kasta oo lagu soo dajinaayo badda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, codsigaasina waa in ay ku dhantahay dhammaan shuruudaha iyo macluumaadka looga baahan yahay sida ku cad foomka codsiga, waana in rukhsadluhu uu soo gudbiyaa macluumaadka hoos ku xusan:
   a) Magaca xariga badda hoosmara iyo macluumaad dhammeystiran oo ku saabsan milkiilayaasha Xariga Fiber-ka badda hoosmara.
   b) Jidka iyo meesha saxda ah ee laga soo dajinayo xarigga oo ay ku jiraan tilmaamaha juqraafi ee xargaha badda hoosmara;
   c) Baaxadda Internet-ka ee loo qorsheeyay xarigga badda hoosmara iyo baaxadda internet-ka loo qorsheeyay in la siiyo codsadaha iyo shirkadaha kale ee haysta rukhsad ay uga shaqeeyaan gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

d) Wixii macluumaad ah ee kale ee ay hay'addu u baahato.

6. Shirkadda rukhsadda la siinayo waa in ay soo gudbisaa codsiga oggolaanshaha si ay u dhigto xargaha badda hoosmara iyada oo la adeegsanayo foomka codsiga caadiga ah ee laga helo mareegta Hay 'adda isagoo soo gudbiya macluumaadka soo socda ee la soo qorsheeyay kuna saabsan saldhigyada xargaha badda hoosmara:
    a. Goobta saxda ah ee saldhigga soo-dajinta xargaha oo ay ku jiraan tilmaamaha juqraafi;
    b. Qaab-dhismeedka lahaanshaha saldhigga soo-dajinta xargaha badda hoosmara oo ay ku jiraan milkiilayaasha aan aheyn saamiley waaweyn (minority partners).
    c. Dhammaan nidaamyada xargaha badda hoosmara ee codsaduhu qorsheynayo in uu ka dejiyo saldhiga ama xarunta dejinta xargaha badda hoosmara (submarine cable landing station), oo ay ku jiraan macluumaad ku saabsan lahaanshaha iyo baaxadda internet-ka ee nidaamyadaas xargaha badda hoosmara.
    d. Macluumaadkii kale ee ay Hay'addu dalbato.

7. Codsadaha oggolaanshaha dhigidda xargaha badda hoosmara meel ka mid ah dhulka Jamhuuriya Federaalka Soomaaliya, waa in ay helaan oggolaansha soo socda:
    a) Oggolaanshaha fasaxa amniga ee Wasaaradda Amniga Gudaha;
    b) Oggolaanshaha fasaxa dhigidda xargaha badda hoosmara iyo sahanka ee badda Soomaaliya ee Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda;
    c) Oggolaanshaha sahanka ee Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyadda iyo Hay'adda Isgarsiinta Qaranka
    d) Oggolaansho fasaxa badqabka deegaanka ee Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada, iyadoo codsaduhu wasaaradda u gudbinayo warbixinta saameynta deegaanka iyo bulshada (environmental and social impact assessment and audit report).

8. Codsadaha raadinaya rukhsad uu ku soo dejiyo xargaha badda hoosmara ama ka dhiso kuna shaqeeyo saldhig soo dejinta xargaha badda hoosmara, waa in uu Hay'adda u soo gudbiyaa dhammaan heshiisyada uu la galay shirkado ajnabi ah si ay u meelmariso ka hor inta aan heshiiskaas la dhaqangelin.

9. Hay’addu waa in ay ka jawaabto codsiga ku saabsan dejinta xargaha badda hoosmara ama dhismaha iyo hawlgelinta saldhigga dajinta xargaha badda hoosmara, muddo aan ka badneyn afartan iyo shan (45) maalmo shaqo laga bilaabo marka la helo codsiga iyo dhammaan dokumentiyada iyo oggolaanshayaasha loo baahan yahay.

10. Haddii ay Hay’addu diiddo codsiga, waa in ay si qoraal ah u soo saartaa go’aan sharraxaya sababaha ay codsiga ku diiday.

## Qodobka 7$^{aad}$:
## Heshiisyada shirkadaha Ajnabiga ah

1. Rukhsadluhu waa in uu u soo gudbiyaa Hay’adda wax-ka-beddel kasta oo lagu sameynayo heshiis horay ay ugula jirtay shirkad ajnabi ah, si loo ansixiyo, ka hor inta uusan isbeddelkaas dhaqangelin.

2. Dhammaan heshiisyada ganacsiga ee xargaha isgaarsiinta badda hoosmara waa in ay u hoggaansamaan dhammaan xeer-nidaamiyeyaasha Hay’adda oo ay ku jiraan xeer-nidaamiyaha tartanka suuqa.

3. Shirkad rukhsad heysata oo dhigatay xargaha isgaarsiinta ee badda hoosmara meel ka mid ah dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in muddo soddon (30) maalmood gudahood ah oo ka billaabanaysa taariikhda dhaqangalka xeer-nidaamiyahan ugu soo gudbisaa Hay’adda dhammaan heshiisyada ganacsi ee ay horay ula gashay shirkadaha ajnabiga ah, si loo hubiyo in heshiisyadaasi ay waafaqsanyihiin dhammaan shuruudaha xeer-nidaamiyahan, iyo shuruucda kale ee khuseeya.

## Qodobka 8$^{aad}$:
## Helitaanka iyo Isla-degitaanka (Access and Co-location)

1. Shirkadda maamusha saldhigga soo-dejinta xargaha isgaarsiinta ee badda mara waa in ay hubisaa in shirkadaha kale ee rukhsadda haysta ay gaari karaan saldhigyada xargaha si cadaalad ku dhisan oo aan kala takoor lahayn, ayna heli karaan baaxadda internet-ka ee uu leeyahay shirkadda maamusha saldhiga ama xargaha badda hoosteeda mara ama kuwa ay kireyso, milkiilaha baaxadda internet-ka ee xargaha badda hoosteeda marana waxaa waajib ku ah in shuruudaha helitaanka baaxadda (Capacity) ay noqdaan qaab ku dhisan takoorid la’aan.

2. Shirkadda saldhiga soo-dajinta xargaha maamusha waa in shurudahaas iyo jaantuska qaabka isla-dagitaanka (co-location template) ku daabacdaa, si fududna looga heli karaa mareegteeda internet-ka, waana in ay sidoo kale u soo gudbisaa Hay'adda heshiisyada isla-degitaanka ama kiraynta (co-location agreements or lease of submarine capacity) muddo soddon (30) maalmood gudahood ah, ka dib fulinta heshiiska, muddada ugu yar ee heshiiska adeegyada isla-degitaankana (co-location services) waa in ay ahaataa lix (6) sano, haddii aanay labada dhinac si wadajir ah uga soo codsan hay'adda muddo ka yar intaas.

3. Shirkadda maamusha saldhigga soo-degitaanka xargaha badda hoosteeda mara waa in ay adeegga isla-degitaanka (physical co-location) ka dhigtaa mid ay heli karaan dhammaan shirkadaha isgaarsiinta rukhsadda u haysta si ay shirkadahaas rukhsadda haysta ay ugu xiran karaan agabkooda shabakadaha xarigga isgaarsiinta badda hoosmara ee taga saldhigga.

4. Shirkadda maamusha saldhigga soo-degitaanka xargaha badda hoosmara waa in ay si niyadsami ku jirto kula heshiiyaan shirkadaha isgaarsiinta rukhsadda u haysta, hannaan waafaqsan Qodobbada 50-51 ee Sharciga Isgaarsiinta Qaranka, waana in heshiiska isla-degitaanka lagu daraa shuruudaha farsamo iyo ganacsi (technical and commercial terms).

5. Haddii shirkadda maamusha saldhigga soo-dajinta xargaha badda hoosmara aysan awoodin in ay bixiso boos isla-degid (physical co-location) oo ku yaal saldhigga, waa in shirkaddu u sameysaa shirkadaha isgaarsiinta ee rukhsadda heysta ee dalbaday isla-degidda; qabanqaabada goob macquul ah oo ay ku soo xirmi karaan oo u dhow saldhigga soo-dajinta xargaha badda hoosmara.

6. Shirkadda maamusha saldhigga soo-dajinta xargaha badda hoosmara waa in ay hubisaa shirkadaha isgaarsiinta ee rukhsadda heysta in ay awood u yeelan karaan in ay bixiyaan ama ay dhinac saddexaad ee shirkadaha isgaarsiinta ee rukhsadda haysta ay ka helaan adeegyada gaaridda shabakada (backhaul facilities and services) si ay ugu xirmaan baaxadda xargaha badda hoosmara ee goobta isla-degitaanka fog (virtual co-location) ah ee lagu heshiiyay.

7. Haddii shirkadda maamusha saldhigga soo-degitaanka xargaha badda hoosteeda mara iyo shirkadaha isgaarsiinta ee rukhsadda haysta ay ku heshiin waayaan shuruudaha ganacsiga ama farsamada ee isla-dagitaanka soddon (30) maalmood

gudahood oo ka bilaabanaysa taariikhda codsiga adeegga isla-dagitaanka, dhinac kasta waxa uu codsan karaa in Hay'adda ay dhexdhexaadiso khilaafka oo ay soo rogto shuruudo macquul ah ee adeegga isla-dagitaanka (co-location service), haddii ay dhacdo codsi noocaas ah, Hay'addu waxa ay ku wargelinaysaa dhinacyada in ay ugu soo gudbiyaan shuruudahooda ganacsi iyo farsamo ee ay soo jeediyeen muddo toban (10) maalmood gudahood ah oo ka bilaabanaysa marka codsiga dhexdhexaadinta laga qabtay.

8. Hay’adda waxa ay si qoraal u soo saaraysaa go’aan ku saabsan shuruudaha adeegga isla-degitaanka (co-location service) muddo lixdan (60) maalmood gudahood ah oo ka billaabanaysa markii loo soo gudbiyay shuruudaha ay dhinacyadu soo gudbiyeen.

9. Shirkad kasta ee maamusha saldhigga soo-degitaanka xargaha badda hoosmara, waa in ay muddo soddon (30) maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda dhaqangalka xeer-nidaamiyahan u soo gudbisaa Hay'adda dhammaan heshiisyada isla-degitaanka ee ay gashay ka hor inta aan la dhaqangelin xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 9$^{aad}$:
## Tayada Adeegyada iyo Dammaanadqaadka Heerka Adeegga

1. Shirkadda maamusha saldhigga soo-degitaanka xargaha badda hoosmara waa in ay u hoggaansamaan dhammaan tilmaamaha iyo xeer-nidaamiyaha tayada adeegyada isgaarsiinta ee ay Hay’addu soo saarto.

2. Shirkadda maamusha saldhigga soo-degitaanka xargaha badda hoosmara waa in ay bixiyaan dammaanadqaad heerka adeegga (Service level guarantees) oo ugu yaraan u dhigma dammaanadqaadka adeegyadooda ama kuwa ay siiyaan shirkadaha ay bahwadaagta yihiin.

3. Haddii aysan jirin xeernidaamiye tayada adeegga la xiriira oo ay ansixisay Hay’addu, shirkadda saldhigga soo-degitaanka xargaha badda hoosmara waa in ay u hoggaansantaa tayada heerarka adeegga ee waafaqsan hababka ugu wanaagsan ee caalamiga ah.

## Qodobka 10aad:
## Kormeerka iyo Ciqaabaha U-hoggaansanaan La'aanta Xeer-nidaamiyahan

1. Hay'addu waxa ay dhaqan-gelinaysaa qodobbada Sharciga Isgaarsiinta Qaranka, xeer-nidaamiyeyaasha oo ay ku jiraan shuruudaha rukhsadda khuseeya, si waafaqsan qodobbada Sharciga Isgaarsiinta Qaranka, iyada oo ganaaxyo ama xannibaado kale oo ku habboon ku soo rogi doonta dhinac kasta ee ku xadgudba qodobada xeer-nidaamiyeyaashan.

2. Shirkad kasta oo maamusha saldhigga soo-degitaanka xargaha badda hoosmara waa in ay sagaashan (90) maalmoodba mar u soo gudbisaa Hay'adda warbixin ku saabsan dhammaan xargaha badda hoosmara ee taga saldhigga soo-degitaanka xargaha iyo dhammaan heshiisyada isla-degitaanka dhisme (physical co-location) ama fog (virtual co-location) ee shirkaddu gashay.

3. Dhammaan dadka uu qabanayo xeer-nidaamiyahan waa inay u hoggaansamaan dalab kasta ee macluumaad ee ay Hay'addu ka dalbato, hadii uu ahaan lahaa habka dalabka macluumaadka ee guud, ama dalabka macluumaadka ee gaar ka looga dalbo shirkad ka howlgasha saldhigga soo-degitaanka xargaha badda hoosmara (submarine cable landing station) ama Xargaha Badda hoosmara (submarine cable).

## Qodobka 11aad:
## Soo-gudbinta Warbixinnada

1. Dhammaan Shirkadaha ka shaqeeya saldhigga soo-degitaanka xargaha badda hoosmara (submarine cable landing station) ama xargaha badda hoosmara (submarine cable) waxa ay si sanadle ah u soo gudbiyaan warbixin waafaqsan habka ay Hay'adda u dalbato, Hay'adduna waxa ay mareegaheeda ku faafinaysaa dhammaan foomamka iyo taariikhda la soo gudbinayo waxa ayna wax-ka-beddeli kartaa shuruudaha soo-gudbinta warbixinta haddii ay u aragto in ay lagama-maarmaan tahay.

2. Warbixinnada Sannadlaha ah - waxaa loo soo gubinayaa si sanadle ah, iyada oo ay ku jiraan warbixinta kaabayaasha isgaarsiinta, heerarka shaqo ee shabakada (Network performance), u hoggaansanaanta shuruucda iyo wixii isbeddel ah ee ku yimaadda lahaanshaha xargaha ama heshiisyada, warbixinnada waa in ay ku jiraan qeybaha soo socda:

a) Dhammaan xargaha badda hoosmara iyo xaaladdooda hawleed (operational status);
b) Heshiisyada isla-degitaanka ah (Co-location agreements) ee la fuliyay;
c) Hawlaha dayactirka ama hagaajinta;
d) Isbeddelka lahaanshaha xargaha ama heshiisyada;
e) Heshiisyada Kireynta (leasing agreements) – Dhammaan Rukhsadlayaashu waa in ay si kooban ugu soo gudbiyaan Hay'adda macluumaadka la xiriira heshiiska kireynta ay la galeen macaamiisha ama shirkadaha kale (leasing agreement), qaab sanadle ah ama marka laga codsado, macluumaadka la soo gudbinaayo waxaa ka mid ah:
   - Magaca iyo xaaladda Rukhsada ee midkasta ee ka mid ah kireysteyaasha;
   - Baaxadda la kireystay (leased capacity) iyo muddada kirada (duration of the lease);
   - Magaca Saldhigga soo degitaanka (submarine landing station) ama nidaamka xargaha badda hoosmara (submarine cable system) ee baaxadda laga kireeyey;
f) Soo ogeysiinta cilladaha aan qorsheysneyn (unplanned outage Notification) – waa in lagu soo gudbiyo laba (2) saacadood gudahood cilladaha aan qorsheyneyn (unplanned outage), khalad, ama xadgudub amni oo aan qorshaysnayn oo ay ku xigto warbixin faahfaahsan shan (5) maalmo shaqo gudahood, oo ay ku jiraan sababta, saameynta, iyo tallaabooyinka sixitaanka cillada
g) Soo ogeysiinta Dayactirka **Qorshaysan (planned maintenance notification)** – waa in lagu soo gudbiyo ugu yaraan toddoba (7) maalmoood oo shaqo ka hor howlaha dayactirka qorsheysan, gaar ahaan haddii ay keeni doonto carqalad adeeg oo ka badan shan iyo toban (15) daqiiqo.

## Qodobka 12$^{aad}$:
## Xallinta Khilaafaadka

1. Haddii uu khilaaf ka dhex-dhaco shirkadda maamusha saldhigga soo-dejinta xargaha badda hoosmara iyo hal ama in ka badan oo ka mid ah adeeg bixiyeyaasha isgaarsiinta ee rukhsada haysta ee isticmaalaya xaruntaas, dhinac kasta oo khilaafka ku lug leh wuxuu u gudbin karaa Hay’adda codsi lagu xallinaayo khilaafkaas.

2. Hay 'addu waxa ay dhammaan dhinacyada khilaafka ku jira u oggolaanaysaa in xalalka ay soo jeedinayaan ee la xiriira khilaafka ay ku soo gudbiyaan muddo soddon (30) maalmood gudahood ah oo ka billaababanaysa marka la qabtay codsiga xallinta khilaafaadka, Hay'adduna waxa ay soo saari doontaa go'aan qoraal ah oo lagu xalinayo khilaafka muddo sagaashan (90) maalmood gudahood ah oo ka bilaabanaysa markii ay dhinacyadu soo gudbiyaan xalalka ay soo jeedinayaan, go'aanka Hay'addauna waxa uu waajib ku yahay dhammaan dhinacyada.

## Qodobka 13aad:
## Dhaqan-galka Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxa uu dhaqangal noqonayaa marka ay meel-mariyaan Golaha Wasiirrada, uuna saxiixo Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.